



SHIRWEYNAHA WADATASHIGA PUNTLAND WARMURTIYEEDKA SHIRKA

17 Maarso, 2020

Hordhac:

Shirweynaha Wadatashiga Puntland ee lagu go'aamiyey Shirkii Golaha Xukuumada Puntland ee ka dhacay xarunta Madaxtooyada Bosaso 7dii bishii Febraayo 2020 ayaa si rasmi uga furmay Qolka Shirarka ee Jaamacadda PSU (Puntland State University) Garowe, 15kii Maarso 2020 soona xirmay 17ka Bisha Maarso 2020. Shirweynaha waxaa isugu yimid ergo iyo goobjoogayaal kor u dhaafey 1,800 oo qof oo isugu jira golayaasha dawladda Puntland, wakiillada ku matala Puntland golayaasha Dawladda Federaalka, Isimmada Puntland, Rai'isul Wasaarayaashii hore ee DFS, Madaxweynayaashii hore ee Puntland iyo Guddoomiyayaal hore ee Golaha Wakiillada Puntland, siyaasiyiin, Cuqaal, Nabadoono, wakiillo ka socda ururrada bulshada (haweenka, dhallinyarada, ganasatada, aqoonleyda), culimmada iyo qurbajoogta Puntland.

Ujeedka Shirkaan wuxuu ahaa sidii qaybaha kala duwan ee dawlad iyo shacabba leh ee bulshaweynta reer Puntland u qiimayn lahaayeen marxaladihii lasoo maray 22dii sano ee tagtay, sidoo kalena talo iyo jihayn ugu samayn lahaayeen mustaqbalka iyo aayaha Puntland, gude iyo dibad ba ayadoo dib loo milicsanayo himilooyinkii loo aasaasay Puntland. Muddadii uu shirku socday waxaa lagu lafaguray mawduucyo kala duwan oo iskugu jira guulaha la gaaray iyo caqabadaha ka jira gudaha Puntland, Federaalaynta Dalka iyo xiriirka Puntland iyo Dawladda Federaalka ah.



Khudbado iyo dood kooxeedyo socday muddadaas 3 da bari ah, Shirweynahu wuxuu isla qaatay qodobadda soo socda:

Go'aanadii Shirweynaha Wadatashiga Puntland

1. Midnimada, Siyaasadda iyo Maamul Wanaagga:

- Shirweynuhu waxaa uu ku baaqayaa in la adkeeyo midnimadda iyo wadajirka Dalka Soomaliyeed, iyadoo loo marayo nidaamka federaliga ah ee lagu heshiiyey.
- Shirweynuhu wuxuu si gooni ah ugu mahad celinayaa Hogaanka Dhaqanka Puntland doorkii shariifka ahaa ee ay ka qaateen aasaaskii Dowladnimada Puntland iyo kaalinta ay ku leeyihiin midnimada iyo wadajirka bulshada Puntland.
- Shirweynuhu wuxuu bogaadinayaan hormarka baaxadda leh ee Puntland ku talaabsatay muddadii ay dhisnayd, horumarkaas oo ay ka mid yihiin dhismaha hay'adaha dawliga ah, bixinta adeegyada bulshada, dhismaha kaabayaasha dhaqaalaha iyo kaalintii hormuudnimo ee ay Puntland ka qaadatay dhismaha iyo taabagalinta dawladda federaalka Soomaaliya.
- Shirweynuhu wuxuu hoosta ka xariiqey in Puntland ay ku aasaasentey shan gobol (Bari, Sanaag, Nuugaal, Sool iyo Waqooyiga Mudug) iyo degmada Buuhoodle. Midnimadaas iyo wadajirkaasuna yahay dastuuri lama taabtaan ah sida ku cad Dastuurka Puntland. Dowladda Puntland iyo dadkeedaba waxaa waajib ku ah xaqiijinta iyo ilaalinta midnimadaas dhuleed iyo dadeed. Shirweynuhu wuxuu sidoo kale ugu baaqayaa dhammaan umadda Soomaaliyeed in ay ku wada noolaadaan nabad gelyo, is qadarrin, iskaashi, wada noolaansho bulsho.



- Shirweynuhu wuxuu u soo jeedinaya dowladda Puntland in la qabto shir looga hadlayo dhulka maqan ee Puntland, lana sameeyo guddi gaar ah oo dabagala hawshaas.
- Shirweynuhu wuxuu aqoonsadey in laga daahey hirgellinta nidaamka dimuquraadiyadda Puntland, wuxuu garowsadey in nidaamka xisbiyadda badan ay qeyb muhiim ah ka tahay xal u helidda tabashooyinka ka jira matalaada siyaasadeed. Shirweynuhu wuxuu ku bogaadinayaa dowladda Puntland ee xilligan in ay goor hore bilowdey geedi-socodka nidaamka dimuquraadiyeynta, wuxuuna ku boorinayaa dhameystirka geedi-socodkaas mudda xileedka dowladdaan. Shirweynuhu wuxuu ugu baaqayaa xukuumadda in ay abuurto jawi iyo saaxad siyaasadeed oo si siman loogu tartami karo, lana siiyo daahfurnaan iyo ixtiraamka madax-bannaanida saxaafadda. Shirweynuhu wuxuu kaloo ku dhiiri gelinayaa xooggaga siyaasiga ah, bulshada rayidka, Culumada, haweenka, dhallinyarada iyo dadweynaha Puntland in ay si aan kala-har laheyn uga qeyb galaan hirgellinta hannaanka dimuquraadiyeynta. Isla shirweynuhu wuxuu beesha caalamka ka codsnayaa in ay ku biiriyaaan taageero farsamo iyo mid dhaqaaleba.
- Shirweynuhu wuxuu ku bogaadiyanaa xukuumadda Puntland ambaqaadka maamul wanaaga gaar ahaan dhinacyada dib u habeynta hay'adaha amniga, shaqaalaha rayidka ah iyo nidaamka maareynta maaliyadda. Shirweynuhu wuxuu kaloo dowladda Puntland ku boorinayaa in la dardargeliyo lana xoojiyo tayeynta, madax-banaanida iyo dhameystirka hay'adda garsoorka si loo helo caddaalad bulsho. Sidoo kale shirweynuhu wuxuu ugu baaqayaa Dowladda Puntland in ay asaasto maxkamadda dastuuriga ah.

2. Amniga

- Shirweynuhu wuxuu aqoonsadey in argagixadu tahay musiibo qaran iyo mid caalami ah, Puntlandna shacab iyo dowladba ay mar walba dagaal kula jiraan cirib-tirka argagixisada. Waxaa xusid iyo boogaadin mudan howlgaladii la dagaalanka argagixida ee sida wadajirka ah loola galay kooxaha Alshabaab ee



soo weerarey degaanada Garacad, Suuj iyo Garmaal sanadkii 2016, kuwa buuraha Galgala iyo la dagaalkii Daacish ee buuraha Qandala. Wuxuu shirweynuhu ku boorinayaa in ay Soomaalidu iska kaashato beesha caalamkuna ay gacan buuxda ka siiso xukuumadda Puntland sidii cadowgaas Alshabaab iyo Daacish loo ciribtiri lahaa loogana sifayn lahaa silsiladda buuraleyda Golis iyo guud ahaan Soomaaliya.

- Shirweynuhu wuxuu u soo jeedinayaa Dawladda in ay xakamayso hubka sharci darrada ah ee gacanta shacabka ku jira, cidda kali ah ee haysan karta hub waa ciidamada amniga iyo ciddii kale oo sifo sharci ah loogu ogolaado.
- Shirweynuhu wuxuu u soo jeedinayaa Dowladda Puntland inay tallaabo deg deg ah ka qaado maandooriyaha iyo daroogooyinka dhibaataada amni iyo dhaqan ku haya bulshada.

3. **Horumarka iyo adeegga bulshada:**

- Shirweynuhu wuxuu garowsadey in heerka dhaqaalaha Puntland aanu dabooli karin baahida shaqo, horumarin, dakhli iyo adeegga bulshada. Sidaas awgeed waxaa dowladda Puntland lagu boorinayaa in ay dejiso istraatiijiyad koboc dhaqaale oo hadafkeedu yahay yareynta saboolnimada iyo abuurista fursado shaqo. Istraatiijiyadaas waa in ay diiradda saartaa ka faa'iideysiga kheyraadka dabiiciga ah, gaar ahaan kheyraadka badda, dhiiri-gelinta maalgelinta, iyo ku jiheynta bulshada dhanka wax-soo saarka, waxaana lagu baaqayaa in la dardargaliyo dhameystirka mashaariicda kaabayaasha dhaqaale ee muddada soo jiidamayay sida ballaarinta iyo casriyaynta dekedda Boosaaso, dhismaha wadada Ceeldaahir – Ceerigaabo, dhismaha dekedda Garacad, hirgalinta kastamka Tuurdibi iyo dayactirka waddada dheer ee Boosaso – Gaalkacyo iyo Garowe - Laascaano, Eyl iyo Garowe. Sidoo kale, waxaa Shir-weynuhu ku baaqayaa in la bilaabo dhismaha waddada Guumays – Buuhoodle, wadada Kalabayr – Caluula, waddada Garowe – Taleex, Boocame, Boosaso – Qandala iyo waddada Galdogob- Garacad.



- Shirweynuhu wuxuu ugu danbeyn dowladda Puntland ugu baaqayaa in ay si degdeg ah ula timaado qorshe cad oo looga hortagayo cudurada faafa gaar ahaan cudurka haatan dunida ku faafaya ee COVID-19.

4. Xiriirka Dowladda Federaalka:

- Shirweynuhu wuxuu qirayaa in Dowladda Puntland ay si mug leh uga soo baxday kaalintii kaga aadanayd dhismaha iyo taabageklinta dowladda federaalka ah, taas oo ah hadaf kamid ah ahdaaftii loo aasaasay Puntland.
- **Dastuurka ku meelgaarka ah:** Maadaama hannaankii dib u eegista dastuurka la baalmarey, maadaama si ula kac ah looga tagey xubnihii dowladaha xubnaha ka ahaa dowladda Federaalka uga qeybgali lahaa gudigga madaxa bannaan ee dib u eegista dastuurka, iyo maadaama uusan harin waqti si waaafi ah looga farabuuxsan karo lana fullin karo arimaha aasaaska u ah dastuurka sida is waafajinta dastuurada iyo aftida dadweynaha, shirweynaha wadatashiga Puntland waxaa uu ku baaqayaa kuna adkeynayaa dowladda Puntland in dib-u- eegista dastuurka DFS dib loo dhigo ilaa iyo muddo-xileedka dowladda imaaneyso ka dib doorashada 2020/2021 si loogu hello waqti waaafi ah iyo wada tashi buuxa
- **Arimaha Doorashooyinka:** Shirweynuhu wuxuu dood-dheer ka yeeshey doorashooyinka 2020/2021 iyo sida looga gudbi karo xilliga kala-guurka ah. Sharciga doorashooyinka oo ay ansixiyeen labada gole ee baarlamaanka Federaalka, Madaxweynaha Federaalkuna saxiixey dhamaadka muddo-xileedkoodii dowladnimo ayaa leh caqabado aasaasi ah oo aan la aqbali karrin una cuntami karin mustaqbalka dalka Soomaaliya.



Caqabadaahaas waxaa ka mid ah;

- a) Wuxuu sharcigu isku dhafayaa nidaamka deegaan-doorashada iyo xisbiyada badan oo dastuuri ah iyo nidaamkii awood-qeybsiga beeleed ee (4.5) oo ka hor imaaneya dastuurka dalka u degsan.
 - b) Shircigu wuxuu dastuuri ka dhigayaa hannaanka awood qeybsiga beelaha oo ay aheyd in laga gudbo oo aan marna noqon karrin sharciga dalka.
 - c) Sharcigu ma abuurayo nidaam doorasho siman oo xildhibaanadu ku soo baxaan.
 - d) Maadaama sharciga la ansixiyey dhammaadkii muddo-xileedka dowladda, dalkuna uusan dhammaan ku wada jirrin gacanta dowladda, waxaa adag in Dalka ay ka dhacdo doorasho qof iyo cod ah. Isla mar ahaantaasna Shirweynuhu wuxuu go'aansadey in aan la aqbali karin in wax muddo kordhin ah loo sameeyo hay'adaha dastuuriga dowladda federaalka.
5. Shirweynaha Wadatashiga Puntland wuxuu ku baaqayaa in si degdeg ah ay saamileydda siyaasada ee dalka isugu yimaadaan shir wada tashi si looga heshiiyo qaabkii lagu geli lahaa doorashada 2020/2021. Waxaa shirweynuhu soo jeediyey in ay dowladda Puntland qaadata dowlada qaran ee kaga aadan ayna fidiso gogoshaas Soomaaliyeed.
6. **Federaalaynta Dalka:** Dood dheer ka bacdi, shirku wuxuu welwel iyo walaac ka muujiyey in nidaamka federaalka ee saldhigga u ahaa axdi-qarameedka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu sii wiiqmayo, dowladda federaalka ahina ay ka weecatey nidaamkii federaaleynta dalka. Gaar ahaan wuxuu shirweynuhu welwel ka muujiyey arimahan;



- Fargellinta qaawan ee lagu hayo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federalka ah iyo nidaamyadooda gudaha, arrintaas oo ka soo horjeeda dastuurka kumeelgaarka ah ee dalka
 - Faragelinta ciidameed ee keentey dhimashada, dhaawaca iyo barakaca bulsho ee ka dhacdey doorashadii Koonfur Galbeed ee Baydhabo, doorashada Galmudug ee Dhuusamareeb iyo colaadda gobolka Gedo ee hadda taagan.
 - Ku takrifalka awooda dowladda sida caburinta xooggan ee siyaasiyiinta ka aragtida duwan xukuumadda, cunaqabateynta socdaalka hawada iyo xayiraadaha waxbarashada ubadka Soomaaliyeed.
 - Ansixinta sharciyo aan ku dhisneyn wada tashi iyo wadashaqeyn dastuuri ah sida sharciga batroolka, midka doorashada, sharciga hawada iyo midka isgaarsiinta.
 - Arimahan oo dhan waxaa ay baalmarsan yihiin qodobada dastuuriga ah ee 53, 54, 120, 142 ee Dastuurka kumeelgaarka ah ee Soomaaliya.
7. Shirweynuhu markuu arkey in la baalmarey heshiiskii dhisidda siyaasadda amnigga dalka ee tibaaxayey tababarka, qalabaynta iyo hogaanka ciidanka ee la saxiixey ka hor shirkii London 2017, wuxuu shirweynuhu walaac ka muujiyey in ay dowladdu dhiseyso ciidan dhinac u rarran oo aan isu-dheelitirneyn, khatarna ku noqon kara aminiga, xasiloonida iyo wadajirka dalka. Shirweynuhu wuxuu ugu baaqayaa dowladda Puntland in ay xisaabtan dhab ah kala gasho Dowladda Federaalka iyo dowladaha gacanta ku siiya Dowladda Federaalka dhisidda ciidanka qaranka Soomaaliyeed
8. Shirweynuhu wuxuu welwel weyn ka muujiyey siyaasadeynta Dowladda Federaalka ay ku hayso deeqaha caalamiga ah oo loogu talagaley arimaha bani'aadamnimada, horumarka iyo adeegga arimaha bulshada. Arintan oo keeni



karta sii jiidanka colaada iyo kala qeybsanaanta bulshada. Shirweynuhu wuxuu ku adkeynayaa dowladda Puntland in ay Dowladda Federaalka iyo beesha caalamka kala xisaabtanto hubinta in deeqaha caalamiga ah aysan dhib u keenin xasiloonida Soomaaliya.

9. Shirweynuhu wuxuu dood iyo falanqeyn dheer ka sameeyey qaabka wada-hadallada Dowladda federaalka iyo Somaliland iyo saameynta ay arintaasi ku leedahay dowladda Puntland. Shirweynuhu wuxuu hoosta ka xarriiqey in aan cid kale go'aan ka gaari karin dad iyo dhul ka tirsan Puntland si waafaqsan Dastuurka KMG. Waxaana shirweynuhu ku nuuxnuuxsadey in dalku leeyahay nidaam federaali ah oo ku saleysan Dowlad goboleedyo xubin ka ah dowladda federaalka ah, wax kasta oo ka baxsan hannankaas lagu heshiiyey wuxuu khilaafayaa dastuurka kumeelgaarka ah ee Soomaaliya, dowladda Puntlandna waa in ay ka yeelataa wada-tashi kana qaadataa go'aanada ku haboon ee dastuurka Puntland u ogol yahay.
10. Haddii ay Dowladda Federalku sii waddo hareer marista Dastuurka Dalka iyo burburinta hanaankii lagu heshiiyey ee Federaalaynta Dalka, Shirweynaha Wadatashiga Puntland wuxuu Dawladda Puntland ugu baaqayaa in iyada oo ka wakiil ah shacabka Puntland ay qaadatao go'aan walba oo lagu badbaadinayo masiirka iyo mustaqbalka Puntland ee Dastuurku u ogol yahay.
11. Ugu danbeyntii, wuxuu shir-waynuhu uga mahadcelinayaa Madaxweynaha Puntland qabashada shirwaynaha wadatashiga Puntland. Wuxuu sidoo kale shirwaynuhu u mahadcelinayaa Guddigii Qaban-qaabada, Jaamacadda PSU, Warbaahinta, Shirkadda Dookh Events, laamaha amniga iyo cidkasta oo door ka qaadatay in shirku guuleysto.

-----Dhamaad-----